# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

| Opened: - 9:48 AM | Hansard No.23/02 | Kal-fadhiga 23aad |
|---|---|---|

**Fadhigii 10aad** **Taariikhda --/01/*2014***

## Warbxinta Wasiirka Wasaarada Maaliyada ee Madax/xigeenka 15 A ee Khasnada Guud ee Qaranka ku saabsan .

**C/raxman Maxamed C/laahi (Cirro) Gudoomiyaha:-** Waxaa Mudanayaal Maanta Fadhigan inoogu Marti ah Wasiirka Maaliyada iyo Saraakiisha Wasaaradaas iyagoo fulinaya Dalabkii Golaha ee inay Warbxin Golaha ka siiyaan Khasnada Guud ee Qaranka oo Goluhu Ansixintii Miisaaniyada 2014ka ka dalbadey Wasaarada Maaliyadu inay Faah-faahin ka bixiso Madax/xigeenka 15 A ee miisaaniyada Qaranka 2014ka ee ku saabsan Khasnada Guud ee Qaranka, waxaana ku soo dhoweynayaa Wasiirka Maaliyada Md. C/casiis Maxamed Samaale, ku soo dhowow Mudane Wasiir.

***C/Caziiz M. Sameele Wasiirka Maaliayda:-*** Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaasha Sharafta leh, Salaan Qaaliya naga gudooma, Mudane Gudoomiye Farxad Weyn bay noo tahay markale inaan idin hornimaadno, iyadoo Golahani runtii aniga qiimo gaara ii leeyahay angoo mudo dheer ka tirsanaa Golahani markaa u yeedhitaankiisa iyo inaan hor imaado farxadweyn bay ii tahay waana ku mahadsantihiin, mudo badan meynaan kala maqneyn halkan ayaad ku ansixiseen Miisaaniaydii 2014ka oo aynu hadeer galney bishii 1aad, xiligaad ansixiseena waxay ahayd bilowgii bishii 10aad, wixii su'aalo eek u saabsanaa Miisaaniyada xiligaa waanu ka jawaabney, hadana hadaad meel ka mida Miisaaniyada inaan ka bixino faahfaahin Goluhu u baahday wax dhib leh runtii uma arko shay caadiyaan u arkaa, markaa macluumaadka iyo guud ahaan warka ku saabsan miisaaniyada waa mid aad idinku haysaan oo idinku ansixiseen oo Golaha Wakiiladu ansixiyo, dabadeeto Madaxwaynuhu uu digreeto Madaxwayne ku saxeexo.

Markaa u imaado nuxurka yeedhmahada Golaha Wakiilada ee wasaarada maaliyadu waxay la xidhiidhaa, **Madax Xigaha15 "A" ee Khasnada Qaranka** sida uu Shirgudoonka Goluhu nagu soo wargaliyay.

Hadaba Mudanayal, Madax Xigaha 15 "A" ee Khasnada Qaranka waxa lagu asaasay go'aan Golaha Wakiilada lagu ansixiyay oo ka soo baxay Golaha Wakiilada, oo tirsigiisuna yahay (GW/GKF/205852012) oo Golaha Wakiilada

ka baxay 31/12/2013kii, waa ansixintii taaasi wa sharciyaa miisaaniyada 2013ka kal hore ina dhaaftay qodobkiisa 3aad ee lifaaqyada ku lamaanaa ee lagu ansixiyay Miisaaniyada 2013 xarafkiisa B ee lifaaqa 2aad siyaasada guud ee miisaaniyda, qodobkiisa 3 ,8,9,12,16 qodobka Madax/xigaha 15"A" ee Khasnada Qaranka.

Hadaan inyar iftiin ka bixiyo sababaha keenay Madax/xigaha 15 "A" samaynta guud ee Dawlada waxa ka mid ahaa maadaama dawladu ay gu darayso, mashaariic horumarineed waxa la isla qaatay in meel la isugu geeyo loona sameeyo madax /xigeen u gaara sida gu cad Siyaasada Miisaaniyada Qaranka qodobka 3aad, isla markaana waxa la isla qaaday in wasaarada maaliyada iyo wasaarada qorshayntu si wada jira u-daba galaan sida gu cad siyaasada miisaaniyada ee ku cad qodobkeega 8aad ee Golaha Wakiiladu ansixiyay, qarashaad hore miisaaniyada qaranka u-gali jirin ayaa la galiyay khasnadaa oo halkaa la isugu geeyay kana muuqda miisaaniyada 2013, kana muuqda miisaaniyada 2014.

Mashaariicda iyo raashinka ciidamada kaarga ah loogu sameeyay ilaalinta cashuuraha oo ku jirta la aasaasay 2013 laakiin dhaqankalgeedu 2014 uu noqondoono ayaa iyana ka muuqatay, waxa iyana khasnadaa guud gala qarashaad kaalmooyin la siiyo hay'addo aan si toosa khasnada guud ugu jirin oo wasaarado ay ka mid noqonkaraa aaney jirin, matalan sida khidmada Baanka, xawilaada xisaabta qaranka iyo xawilaada xaquuqda kala duwan ee sida haweenka, Maamuuska Madaxwaynayaashii iyo Madaxwayne ku-xigeenadii hore ee dalka oo iyguna ka dhex muuqda khasnada guud si toosa sanadkan.

Gunada darajada ciidanka dawlada xiligaa Gudi loo saarey ayaa iyana run ahaantii gudi loo saaray ayaa iyana si toosa uga muuqaday miisaaniyada 2013ka oo iyana loo isticmaalay siday ahayd, waxay gashay khasnada guud ee qaranka, si guud Go'an cad ayuu Golaha Wakiiladu gu ansixiyay miisaaniyadii dawlada ee 2013ka iyo lifaaqii ku lamaana waxan filayaa hadii loo baahdo in laga helayo shir-gudoonka Golaha waxa ay ku taariikhaysanyahay 31/12/2013, waa wax saxa aqbaliyadii Goluhu ansixiyeen iyo guud ahaan go'aankaa ka baxay Golaha Wakiilada taasina waa mid ka mida baahiyaha keenay khasnadaa guud.

Sidaad ogaydeen 2013 mashaariic baa ku jirtay miisaaniyadeena mashaariicdaa waxa la galiyay khasnada guud si aanay wasaaraduhu mar marka qaarkood in Wasaaradaha laga yaabo in ay miisaaniyadoodu ku yaraato mashruuc loogu tala galay si gaara si ayna si ayna wasaaradu miisaaniyadeeda

gaarka ah ayna u isticmaalin ayaa mashaariicdaa meel gaara loo geeyay si ay ugu baxdo mashruucaas oo kaliya u qoondeynteeda iyo kutalagalkeeda, waxaana odhan karaa guud ahaan abuuridaankii khasnadaa 15A taladeedu Golaha Wakiilada ka timi, Wasaarada Maaliyadu way hirgalisay waxayna qaranka u soo kordhisay waxtar, mashaariicdii 2013 ee budgetka ku jirtay oo ay ka mid ahaayeen Wasaaradaha Xanaanada Xoolaha, Beeraha,dabdamiskii iyo E passport.

Dhamaantood bilihii ugu danbaysay ayay wasaaradu sii daysay, waxaana rajaynayaa dhamaantood in uu Goluhu arki doono umaduna arkidoonto anagoo run ahaantii ku faraxsan in kutalakalgaa Miisaaniyadu sidii loogu talagalay iyo si kabadan usoo baxday, ilaahay baanan ka baryayaa in Miisaaniyada 2014 ee Golaha Wakiiladu ansixiyay in ay sidii aan kutalakalnay iyo si kabadan u soo baxdo, anagoo Golaha ka rajaynaya in iskaalmaysi wanaagsan iyo wada shaqayn waanaagsan aanu ka yeelano Gaar ahaan Gudiyadda u xill-saaran hawlaha dhaqaalaha iyo guud ahaan ilaalinta daryeelka Qaranka aad iyo aad baad mudanayaal u mahadsantihiin waxan filayaa diyaar baanu u nahay wixii su'aalo ah ee aad uga baahataan khasnada guud qaranka waanad mahadsantihiin.

Gudoonka:- waxaan Xogheynta ka CodsaWnayaa inay Mudanayaasha Su'aalaha weydiinaya Wasiirka waraaqo u qeybiyaan ay isku qoraan.

**Su'aalaha Mudanayaasha iyo Jawaabta Wasiirka Maaliyada**

1. **Md. Cali Maxamed Aadan:-**

**Su'aal:-**

1. Miisaaniyada 2014ka oo aan bisheedii kowaad ku jirno Goluhu markuu ansixiyay wuxuu raacsiiyay G'aamo Gole iyo soo jeedin, waxaa ka mid ahaa in hay'addaha sharcigoodii lagu asaasey aan la ansixin ee inta la magacaabay institution ahaana u shaqeeya Misaaniyadana ku jirta inaan Miisaaniyada loo sii deyn ilaa sharcigoodii laga ansixinayo oo laga keenayo, ilaa hadana hay'adahaas sharcigoodii Golaha lama hor keenin waxaan filayaa hay'adda HIV/AIDSka ayaa shaley la inoo qeybiyay, kuwii kale wali lama keenin, madaama wali January ku jirno oo bilow tahay miisaaniyadii, lana dhaqan galiyay madaweynuhu dhaqangaliyay, wasiir maaliyada aad qaabka loogu dhaqmayo aad wasaarad ahaan institutionaada dalka aad u qeybiyay, Markaa waxaan rabnaa in sidii Goluhu Miisaaniyada ku ansixiyay in hay'addahaa Miisaaniayda laga joojiyo aad Warbixin naga siiyo?
2. Miisaaniyadii 2013kii waxa gu jiray mashaariic, 38 mashruuc ayaa gu jiray oo loogu tala galay gobolada bariga, 15 Mashruuc oo Gobolka Sool ah,15

Gobolka Badhan ah iyo18 mashruuc oo Gobolka Buuhoodle ah, 38kaa mashruuc ilaa hada waxba kama fulin, Miisaaniyadii sanadkii ina dhaaftay way gu jirtay Madaxwaynuhuna halkan wuu ka cadeeyay khudbad sanadeedkii, Miisaaniyada lagu ansixiyay, miisaaniyadu maadaama ayna fulin Cudhaadh ma loo hayaa oo lacag ma loo hayaa si ay u raacdo Sanadkan aynu ku jirno ee 2014ka, waad mahasantahay?

**Jawaabtii Wasiirka:-**

1. wuu mahadsanyahay xildhibaan Cali, wixii ku saabsan Go'aanada ku lamaanaa ansixinta Miisaaniyada 2014ka dhamaantood waxa ka soo jawaabay Madaxwaynaha Jamhuuryada Somaliland, waxana la waydiin doonaa Shirgudoonka Golaha Wakiilada waa go'aanadii aad soo raaciseen miisaaniyada wixii talooyina ee Goluhu soo jeediyayna oo ka mid ahaa in wasiirka Maaliyadu idiin yimaado waanu idinla joogaa, mashaariicda Miisaaniyada 2013 ku jiray way fuleen dhamaantood ama ku talo-galka Miisaaniyada wasaarada maaliyada ee miisaaniyada 2013 hal Mashruuc oo ka baaqdey ma jirto haba yaraatee, si khaasa ayaa malaha xildhibaanku dee meelaha uu xoqanaya isagey u gaar tahay waana laga yaabaa in ay jiraan.

   anagu markaan miisaaniyada dajinayno wasaaradahaa kala leh, maamulaa kala leh wasaaradna kuma xidhna wasaarad kale mashaariicda aad anaga halkan noogu yeedheen oo Qasnada Guuddna oo ay ku jiray mashruucii E passport, Mashruucii Xanaanada Xoolaha, Mashruucii Beeraha, darajadii Ciidanka iyo tii kaluumaaysiga dhamaantood way fuleen, waa laga yaabaa damdamiskii oo kale oo aan anagu sii daynay November, waa lagayabaa inuu wali maqanyahay anagu waan dirnay laakiin wali dalka muu soo gaadhin laakiin wasaarada maaliyada waa ka fulay waxa laga yaabaa mashaariicda Xoolaha ama darajadii ciidanka ama Xanaanada Xoolaha ama Beeraha ama kaluumaysiga waad arkaysaan sida ay inoogu fushay.

2. Wasiirka Wasaarada Bugetku si toosa ugu jiro waala waydiin karaa haloo yeedho wasiirka masalan Wasaarada Caafimadka hadii Badhan ay ugu jirtay Miisaaniyadii Hore in dhakhtar loo dhiso wasiirka Caafimaadka haloo yeedho oo hala waydiiyo mashruucii halkaa ugu jiray miisaaniyada aaway. Inayl anagu markaan mashruucii miisaaniyada halkaa ugu jiray siinay. Waxa iska dhici karta in miisaaniyada wasaaraduhu wixii loogu talagalay maahee in wax kale lagu isticmalan taasina wasiiradaas haloo yeedho.

   Hadii Wasaarada lagula xidhiidho mashruuc gaara degmo ama gobol aad adigu sida gaarka ah uga soo jeedo masanlan riig hadaad rajaynaysay waxa wanaagsan in uu u yeedho wasiirka aw ogyahay in uu wax ka waydiiyo hada waxaanu ka hadlaynay qasnada iyo mashiirkii bugetka haday tahay damdamisyada, haday tahay xanaanadi xoolaha haday tahay kaluumaysiga mid walba sidii loo gu tala galay baanu ku siinay al axmdu li laah in aanaan lahayn Bugdet kii mashruucii 2013 wax baa iska kaa ya

dhimay oo masuuro galin manu odhan mana odhanayno sidii loogu dala galay baa anaga u qabsoomay waalaga way diin karaa wasiir aniguba hadaan ahay wasiir kii maaliyada halkaa iyada ah waa la iga waydiinkaraa waxa la iga waydiin karaa qasnada guud eed iigu yeedheen iyo waxyaalihii gu goobnaa markay tahay si guud ee wasaariyada maaliyada iyo wasaarada qorshayntu waxa qasnada guud eed idingu ansixiseen ku cad in wasaarada maaliyada iyo wasaarada qorshayntu ay dabakalgeeda iyo ka warhaynteeda ay tahay in ay ogaadaan waanu ka warhaynaa mashaariicada ma siidayno ilaa aanu hubino maslan waxan odhan karaa ee aanan fulinkarayn bilaha hore ee bilaha 7aad iyo 8aad ee loogu dala galay masalan in uu fulo laba waji ama sadex waji in loo sii daayo bilihii 7aad waxaad sii daysay wasaaradu waxa laga yaabaa in ay hayso ilaa bugetka loo sii wada daayo bugetka ugu jirta aanay qalabgay soo iibinlahayd aanay soo iibin karay masalan wasaarada beeraha cagaf cagafyo ayaa bugetka ugu jiray in ay soo iibiso anagu sadex qaybood ayaan u sii daynay sadex quarter waxan filayaa wali in aanay soo gaadhin oo ay soo socdaan waxan filayaa anagu in aanu sidii loo gu tala galay anu isii daynay lacagtii oo nu nidhi mashruucaasi waa in ay fushaa danta iyo gobalada wax yaalaha ka qabsooma run ahaantii dee waxan is leeyahay sideedaba miisaaniyadeenu waa ay iska xadidantahay oo kol hore ba in si kaara mashaariicda miisaaniyada meel kaara lagu qoro awalna yacnihii markii ugu horaysay bay ahaayd la xisaabtan dhaba yacnihii mashaariicdaa aan sida kaarga ah aan qasnada gaarka ah u galinay anigu ka hadli mayo wasaarad kaara oo mashruuc kaara in ay fuliso ahayd ma fulisay mise may fulin, ee waxa ikaga haboon in wasiirka wasaaradahain la waydiiyo laakiin tan khasnada ee ay nu hayno waxan leeyahay dhamaan dhamaan siday u dhanayd way fushay miisaaniyadeenu halkii ay mishear la bixiyo uun ka ahaan lahayd waxa in ay timaado mashaariic kala.

3. **Md. Maxamed Faarax Qabile:-**

**Su'aal:-**

1. Waxaad sheegtay in Khasnada Guud anaga xeerar baa sheegaya sida maamuuska madaxwaynayaashii hore iyo madaxwayne ku xigeenadii hore xeer bay leeyihiin ---- akhriyay maamuusku sida.?

**Jawaabta Wasiirka:-**

**1.** Mudane maxamed Faarax qabile aad buu umahadsanyahay waxaan is leeyahay su'aalihiisa waxa yara weheliyay si uu isagu wax u doonayay oo uu u sharaxay laakiin markaan su aalaha toos u soo qaado yaa acountible u ah qasnada guud wasaarada beeraha ayaa soo qorata mashruucii wasaarada maaliyada ayaa la eegaysa wasaarada iyo wasaarada maaliyadu markay mashruucii is la eegaan madaxwaynaha ayay u gaynayaan dantaa ay wasaarada beeruhu leedahay ayuu mashruucaasi u fulayaa masalan markay

darajadii ciidanku gu jirday miisaaniyadii 2013 guddi buu madaxwaynuhu u saaray lacagtii gu jirtay darajada ciidanka gudiddaa uu madaxwaynuhu usaaray indaanu sanadku dhamaan ayaa mishaaradii darajada ciidanka la bixiyay yacni qasnadaa wixii gu jira waxa names u ah wasaarada maaliyada iyo wasaarada qorshaynta  inay ku kormeerayaan sida ku cad xeerka aad idingu ansixiseen oo siday ku cadeeyeen xeerkaa maxamed iyo xildhibaanada kalewaxad ansixiseen  30/12/2013 waa mid ay si wayn ugu cadahay qasnadaa guud laakiin waa in ay ilaalintii muuqado in miisaaniyada mashaariici ku jirto,waxan aad ula yaabayaa qasnadaa guud waxay ahayd kal hore wax aad aad noogu mahad naqdeen sidaan usoo dhignay miisaaniyada sidaad gu ansixiseena way ku dhaqan gashay go aamadii aad soo raaciseena sideedaa loo qaaday madaxwaynuhuna jawaabta uu ga soo bixiyay waa jawaab saxa oo sharciga waafaqsan idinkuba sidaad sharciga u soo waafajiseen waxan jecelahay in ad idinkiyo shirgudoonku intaa wada eegtaan.

**4. Md. C/raxmaan Maxamed Jaamac (aw-xoog)**

**Su'aal:-**

1. Bacda salaam waxan halkan mahad balaadhan uga soo jeedinayaa wasiirka wasaarda maaliyada maxamed samaale iyo agaasimaha guud ee wasaarada maaliyada iyo agaasimaha waaxda miisaaniyada waxan aad uga mahad celinayaa wasiirku sida uu noogu yimid manta isaga oon u lahayn oo wasiirkii ulahaa dhoofay waxanan ka rajaynayaa wasiirada kale wasiirkaa in ay ku taydan sharciga u hogaansamay ee markaan u yeedhnay markiiba noo yimid sobobtoo ah wasiiro badan ayaa naga dhego adaygay wasiirku waa mahadsanyahay?

2. Wasiir qasnada miisaaniyada 2014 go aamo iyo talooyin ayaanu raacinay go aankan imika adiga iyo gudoomiyuhu aad isla afgaradeen waa qodobka 6aad in uu golaha hor imaado wasiirka wasaarada maaliyadu si wax looga waydiiyo abuuritaanka qasnada miisaaniyada guud sifiican baan u ansixinay miisaaniyada adna wakhtigeedii baad gu keentay waanu gu mahadinaynaa laakiin

Waxa su aashayda 1 cashuurtii takaaliifta ee cashuurta 4 laabka ah lagu gordhiyay badeecadaha ka soo dega degadaha jamhuuriyada Somaliland iyo xoolaha nool iyo gaadiidka kala duwan iyo gadiidka booyadaha waxa ka timid culays dhaqaale oo fuulay bulshada danyarta ah magu tala jirtaan hadaad tihiin wasaarada maaliyada in aad xerkan takaaliifda waxka bedel iyo kaabis

gu samaysaan cashuurta ood ka daysaan ama ka dhintaan kaar ahaan booyadaha ay dhibtu ka daagantahay waan ognahay in uu xeerka nalaga xoog roonaaday qoladayadii 8ahaa wasaaradaha marka uu wuxu soconwaayo waxka bedel iyo kaabis baa xeerka lagu sameeyaa markaa in xeerkaa dib dadkaa danyarta ah la faragalinkaro

2)su aasha labaad horaa laguu waydiiyay waan ka boodayaa miisaaniyada dowladu soo gudbisay ayuun baa dhaqan gashay anaga taayadii waanalagu soo celiyay sifooyinkii iyo go aamadii talooyinka madaxwaynuhu soo celiyay ama soo diiday anagu maanu argin gudoomiyuhuna noomuu keenin waan ka sugaynaa gudoomiyaha si aanu uga qaybqaadano anaga oo ku jirna shaqadayadii dastuurika ahayd go aamo ayaanu ku lifaaqnay talooyin baanu raacinay aduu waxad iskaga riixday shirgudoonka ama gudoomiye c/raxmaan godoomiye waanu kaaga fadhinaa,

Calal aqal wasaarada maaliyadu ma qaataday talooyinkii aw miisaaniyada2014 soo raaciayay golaha wakiiladu kaar ahaan nambarka 2aad ee talooyinka oo odhanay iyada oo la eegayo heerka sixirbararka ka jira Somaliland in loo gordhiyo ciidamada qaranka iyo shaqaalaha mashaarkooda 40% mise iyagana waxay gu jiraan warqadaha la soo celiyay oo gudoomiyaha uun baan ka sugnaa. Mishaarkii aanu soo jeedinay in la gordhiyo inaad gordhiseen in aan diideen iyo in ay gu jiraan warqadaha uu godoomiyuhu hayo,cabasho kale ayaa jirta madaama aadahay wasiirka maaliyada wasiirka maaliyada iyo wasiirka arimaha guduhu badanaa dee masuuliyad culus bay hayaanoo cabashooyin badan iyo eedo ayaa loo soo jeediyaa anagu dadka aanu ka wakiilga nahay markay noo keenaan cabashooyinka waanu idiinsoo gudbinaynaa saaka inga oo ka qureecanaya maqaaxida madaxtooyada horteeda gu taal waxa igu soo xoobmay dad badan oo gaadiidlaya oo laangurusalo wada,in ga badan 500 oo laangurusalo ah ayaa ka shaqaysta haayadaha waxaa gawaadhidaa loo kireeyaa haayadaha imaada wadanka markay samaynayaan qiimaynta arin cusub ayay ii sheegeen oo ku soo gordhay gaadiidlaydaa oo ugub ku ah jamhuuriyada Somaliland wasaaradihii waxay shaqadii kala wareegeen gawadhiyadii dadwaynaha ama laangurusaladii ee lagu masruufayay dadka danyarta ah ee reer Somaliland waxa haayadihii laga kireeyaa gawadhitii gtka ahaa ee wasaarada oo la leeyahay forget about the privet langurusal waxan idinka kiraynaynaa gawaadhidii gtka ahaa adna cashuurbad ka doonaysaa dadwaynaha gaadhiga g tka ee la kireeyana cashuur ka heli maysid WASIIR arinkaa hadii aad ka war hayso ama xukuumada maadaama aad aduu u qaabilsantahay miisaaniyada siyaasada miisaaniyada

siyaasada xukuumada uga taal in gawaadhidii g tka ahaa ay ga shaqeeyaan hayadaha oo ay wasiiradu ku amraan.

**Jawaabtii Wasiirka:-**

Bismilaahi raxmani raxiim aad iyo aad buu u mahad sanyahay saaxiibkay c/raxmaan xoog waxaad igala hadashay war wasaarad maaliyaded iyo tu miisaaniyadeed iyo warkii suuqa oo hubsiimo u bahan

Xeerka takaaliifta wadooyinka golaha wakiilada ayaa ansixiyay ee wasaarada miisaaniyadu wax ay ansixisay lama iman hadii xeerkaa dhaliili gu jirto dhaliisha gowaad golaha wakiilada ayaa le dowladu cashuurbay u baahantahay waad ogtihiin dalkeena aduunyadu inama caawiso inaga wax qabsana hadaan doonayno wadada Barbara iyo hargaysa in aynu hagaajino ama wadada burco iyo ceerigaabo in aynu dhisno ama ta oodwayne iyo hargaysa in aan waxka qabano ama ta salaxlay iyo hargaysa in aan waxka qabano oonu diidno baabuurtii maraysay shilin in aan ka qaadno see lagu helayaa ma samaday ka imanaysaa cid samaysi markaa qofka xildhibaanka ahi dee marka xeerkaa wadooyinka uu gu ansixiyay aqbaliyad guud halka galena uu ka sheegayo xumaan maanu ahayn qof isagu is burinaya marka xeerka takaaliifta aw isagu ansixiyay marka kalena aw xukuumada si qaldan wax uga shegaya waan idiin sheegay xeerkaa aad aansixiseen ee wadooyinka wadooyinka ayay si toosa ugalaysaa lacagtan baabuurta laga qaadayaa ee qofkasta laga qaadayaa waan idiin shegay bugetkeena dowlada ee mishaarnoqonaya ee dowladeena meelna kama galayo. Waxan odhan karaa golaha wakiiladu shari iyo wuxuu leeyahay awood golaha wasiiaduna wuxu leeyahay awood way kala madax banaanyihiin hadana way isa soo hoos galaan xeerlaasi wakiilada waa ka soo gudbay xeerka idingu waxbaad ka bedesheen sidii aad wax uga bedesheen baanad ku ansixiseen anigu waxan qabaa markaan si dhaba iskula hadalno cashuuraha dadkeena laga qaadaa in ay aad iyo aad iyga hooseeyaan cashuurha wadamada jaarka ah laga qaado waxad ogtihiin manta waxyaabahan aynu horumar dalkeenu ugaadhi leeyahay waxyaalo badan oo ay ahayd in la cashuuro oo hoos u dhigan ama aan cashuur laga qaadin hadii aynu wax isku dayno oo in taynaan tijaabadii gaadhin hadana laga horyimaado waxay leedahay dhibaatadeeda idingu xeerkaas aad ansixiseen way is arkeen xekuumada gaar ahaan wasaarada maaliyada daakhiliga wakaalada biyahay maayirka caasimada waanan isla gaadhnay go aamdii bay isla qaadeen markaa golaha waxa looga baahanyahay markay xeerka soo dhaqangaliyaan in ay xeerka difaacaan maaha in xeerka ka horyimaadaan oo ay iyagu dib isku caayaan markaa sharaf dhac wayn bay ku tahay waxad idingu ansixiseen in aad idingu ka hor

timadaan marka hore waxad ka doodaysaa xeerka waxka bedelkiisa iyo kaabistiisa laakiin markaad go aan ku qaadatay in uu sidaa iyo sidaa ku hirgalo marka danbe in aad ka qaybqaatado horumarka iyo hagaajintiisa ayaa waajiba laakiin ta ku saabsan mishaarka ciidanka booliska c/raxmaanow saaxiib xukuumada kulmiye imisa jeer ayay mishaarka gordhisay bal xisbigii aadka tirsanayd ee udub halkee laga soo qaaday gordhinta mishaarka iyo darajada ciidamada waad ogaydeen 2013 darajadii ciidanka ayaan lacag ku bixinay oon mishaarku bixinay labaadan kii sanadood ee ciidankeena darajo la siin kari waayay darajo ee xukuumadeenu ku dhiiratay in ay darajo siiso oo darajada la siiyay ay ku dhiirato in uu qofku darajada aw qaado aw mishaargu qaado waxa goluhu shahaadada igu siinayay iyo ixtiraamka ayay ahayd gordhinta mishaarada ciidanka gordhinta gordhinta darajadii ciidanka waxaas oo dhan ayaa bugetka ka muuqday run ahaantii mishaarkii ciidanka iyo mishaarkii shaqaalaha %15 u gordhinay sow darajadii ciidanku ma weheliso een c/raxmaan malaha waxad ilowsantahay in aad halkan shahaado igu siisay markaa sanadka soo socda waa in mishaarada ciidanka indaa iyo indaa laga dhigo dee waxan u arkayaa kaambayn uu c/raxmaan sxb c/casiis gula jiro ee uma arkayo in ay tahay irin dhaba oo waaqiciya waayo hadii darajadii aanu lacag ku bixinay oo mishaaradii ciidanka iyo shaqaalaha aanu u kordhinay %15 sanadka soosocda waa in waxaa iyo waxaa laga dhiga waa ismaqashiin uun ban u argaa markaa sanadkan bugentkii aanu dejinay in uu hirgalay iyo in kale nala hubi c/raxmaanow miisaaniyada waxan sanadkii soo saari karno nala qabado nala eeg laakiin bugetka waxaa ka dhig ima odhan kartid waxan ka dhigi karayo anaa qaabilsan oo xukuumada iyo dowlada u qaabilsan waa in ay kala soocnaadaan howsha aan leeyahay iyo hawsha aad leedahay markaa mishaarka ciidanka sidaa ka dhig iyo waxa ka dhig maad ka dhigtid ood daahir rayaale ka dhig tidhaahdid markaa taasi waxan ku odhan lahaa xiliga kaambaynka hala sugo miisaaniyada waxan soo jeedinayaa in miisaaniyada aad ka dhigto sidaa iyo sidaa waatalo haday soorto gali waydo maxad uga dhigi wayday ima odhan kardid anagu waxan u aragnaa markaan ciidanka darajadii mishaarku bixinay ee mishaaradii ciidanka iyo shaqaalaha kordhinay ee horena loo gordhiyay in aanay hagrasho jirin baan u aragnaa waad ogtihiin in miisaaniyadii ugu danbaysay ee 2010 aynu ansixinay anigoo inila jooga 47milyan bay ahayd miisaaniyada manta aad ansixiseen ee xekuumaduna 152milyan weeyi markaa waxan u argaa uu n hadalkii saaxibkay c/raxmaan xoog deemalaha shahaadadii baa lagu xantay oo la idhi maxaad u siiseen marka waxan u argaa mid ay su aasheedu mucaarad tahay.

**5. Md. Baar Siciid Faarax:-**

**Su'aal:-**

1. Mudane Wasiir waad salaamantahay, anigu waxan ku waydiinayaa uun hal suaal waxa weeyi miisaaniyadii sanadkii 2013 waxa gu jiray 1500 oo qof oo shaqaala ah hadaanan anigu qaldanayn een ilaa mudo laga joogo lix bilod ayaa waxa lagu meeraysanaynay haayada shaqaalaha inan baan geeyay ka soo baxay jaamacada goday markaa 1500 ee shaqaalaha ah ma si kaara loo gu qoray wasaaradaha oo waa loo gudbiyay haayada shaqaalaha mise dib baad uga noqoday oo qasnada miisaaniyada ayay inoogu jirtaa su aasha labaad sarifkii lacagtu waxay maraysaa yacni heer aanay umadu ku noolaan Karin oo qofkii shaqaalaha ahaa yacni ku adag sobobtoo ah dadka shaqaaalaha ah ee caruurtii isguulada ugu jiraan ee guryihii giradii doolar laga ay bixiyaan giro iyo isguul iyo caafimaad waxaba doolar baa lagu iibshaa hadaad tihiin xukuumada ama wasaarada maaliyada maxay ka yiraheen anaga xukuumadayadii hore markay lacagtu gaadho 600 markiiba hoos baa loo celin jiray markaa arinkaasi waa arin dhaawaca oo dadkii shacabka ahaa raashinka doolarbaa lagu iibiyaa guryahayha kiradoodu waa doolar caruurta isguulkoodu waa doolar ninkii A ahaa mishaaradii uu qaadanayay waa 100 imisa ayuu u qaybini

**Jawaabta Wasiirka:-**

Xildhibaan Baar waad mahadsantahay arintaa shaqaalaha ee miisaaniyada2013 mar iyo laba ba waan ka hadlay magaranayo in aad ka maqnayd iyo inkalemiisaaniyada 2013 markaan ka hadlayay shaqaalaha runtii miisaaniyada ku jiray 2013 wuu qeexnaa wasaaraduhu sida ay u leeyihiin shaqaalah sanadkan2014 wuu qeexanyahay shaqaalaha siday wasaaraduhu ugala leeyihiin wasaarad wasaarad baan u sheegay wasaarada ay hal qof ugu qorantahay bugetka sanadka in ay qaadan doonto waan sheegay kal hore wasaaradaha u badnaa waa sheegay wasaarada caafimaadka iyo wasaarada waxbarashada midna 500 bay lahayd mina 400 bay lahayd inys kale wasaaradaha kale bay u qaybsanaayeen marka wasaaradu 500 oo shaqaalaha u baahantahay macalimiin jaamiciyiina oo ay wasaarada waxbarashadu u baahantahay oo wax ka dhiga dugsiyada dhexe ama sare ayaay qaadanaysaa sidaasaan anuu sheegay masalan anagu wasaarad ahaan cidii lahayd baanu sheegnay wasaarada caafimaadka intaasoo dhakhaatiir baa ka soo baxaya masalan kuliyadaha caafimaadka ee jaamacadaheena wasaaraduhu maqaadeen 500 ama200 ama300 wasaarad wasaarad baad u

waydiin doontaan wasaarada maaliyada shaqaalay qaadanaysay haayda shaqaalahaan keeyay intaasoo maalmood ayay imtixaan galayeen imtixaanada sadex da gobol ee barigana burcaa lagu qaaday sadex da gobol ee galbeedkana hargaysaa lagu qaaday sanadkan shaqaale badani kuma jiraan miisaaniyada shaqaalaha aanu qaadanaayi aad buu u xadidan yahay dobankii shaqaalaha ee aanu qaadano qaar baa waardiyayaal boqonayo qaar baa nitiifisooyin noqonaya masalan wasaarada maaliyadu sanadkan waxay qaadatay 300 oo shaqaale 200 shaqaale hoosay ahaayeen oo C D 100 kale aya ahaa A IYO B.

**6. Md. Xuseen Ismaciil Yusuuf:-**

**Su'aal:-**

1. Wasiirka aad iyo aad baan ugu mahad naqayaa markay nu doonayno in u golaha horyimaado waa halkan shahaado ayaa lagu siiyay udub markaa ahayn halkay ahaay wuu ka sii qaaday dadaalkiisa gaar ahaaneed aad iyo aad baan ugu mahad naqayaa waxan qirayaa sida fiican ee uu uga jawaabayo su aalaha xildhibaanada wasiir waxad ahaan jirtay mudane ka tirsan golaha wakiilada weaknaseskiisana waad ogayd markaa waxba halkaa hadii wax aanu improve karaynay oo dhaqangalay aan ku waydiino hakugu egaada uun taasi waa taas qasnada guud waa qasnad xidhan oo si alaala iyo si loo isticmaalayaa iyada oo la furo mooyaane oo sida bugetka wasaaraduhu u furanyihiin ee shilin waliba l ogyahay halka uu ku baxayo su aasha waxa keenay in aan sii adgayno waa laccag badan oo si alaala iyo si loo isticmaalayo aan la garanayn waanu ansixinay lifaaqyo ayaanu raacinay arintaa kolay gudoomiyaha ayaanu ka sugaynaa

**Gudoomiye C/raxmaan Maxamed C/laahi:-** Wasiirku wuu Mahadsanyahay .iyo saraakiisha la socota ee Wasaarada Maaliyadu, Fadhiga barito waxaa Golaha hor iman doona Wasiirka Wasaarada Macdanta iyo Tamarta, Fadhigii maantana Sidaasuu inoogu xidhanyahay.

***Adjouned at 11: 20 AM by the speaker of the house***

| Cawad Cali Maxamed | C/risaaq Siciid Ayaanle |
|---|---|
| Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada | Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI |
| ------------------------------------------------ | ----------------------------------------- |